



Hagaha Ka Saarista Hoyga

Tallaabo-Tallaabo

① Bixi Ogeysiis (milkiilaha)



Ogeysii Kiraystaha sababta/marka uu baxayo.

- a) Isticmaal *Ogeysiiska* ku habboon xaaladdaada:
- JDF 99 Dalabka U Hogaansanaanta
 - Kirada aan la bixin.
 - Ku xadgudubka heshiiska ijaarka.
 - Dhaqan niyad jab ah.
 - JDF 99 B Ogeysiiska Joojinta Kiraysiga
 - Ku celcelinta xadgudubyada heshiiska kirada.
 - Dhaqan dambiyeed.
 - JDF 99 C Ogeysiiska Ka saarida khalad-La'aanta
 - Aan dib loo cusboonaysiinaynin heshiis kiro.
- b) *Ogeysiiska* wuxuu leeyahay macluumaad muhiim ah oo ku saabsan sida saxda ah ee loo siiyo Kiraystaha (*gaarsiin*).
- c) Sug wakhtiga lagu sheegay *Ogeysiiska* kahor Talaabada 2aad.

Dhexdhexaadinta Waajibka ah

Hubi Ogeysiiska si aad u aragto haddii aad u baahan tahay dhexdhexaadin ka hor inta aanad kiis xerayn (Tallaabada 2aad). Hadday sidaas tahay, muddayn ka samayso barta:

[\[www.ColoradoODR.org\]](http://www.ColoradoODR.org)

② Bilow Kiiska Ka Saarida Guriga (milkiilaha)



Buuxi foomamkaan. Karaaniga Maxkamadda ayaa muddayn u samayn doona Taariikhda Soo Celinta markaad xareysa:

- JDF 101 Cabashada
- JDF 102 Yeedhmooyinka (*waxaa saxiixay Karraaniga*)

U daabac nuqul maran kireyste kasta:

- JDF 103 Jawaabta Ka saarida Guriga
- JDF 108 Codsiga Dokumentiyada

③ Gaarsiinta Gaarka ah (milkiilaha)



Sii nuqullo ah dhammaan afarta foom ee Talaabada 2aad Taliyaha Bilayska deegaanka ama farriin-gaarsiiyaha, oo ay la socdaan:

- JDF 98 Bayaanka Dhaarta ah ee Gaadhsiinta (*kaliya samee §§ 1-4*)

Farriin-gaarsiiyaha ayaa dhammaystiraya gaadhsiinta, buuxinaya foomka, oo kugu soo celinaya adiga. Ka dib, ka xaree Maxkamadda.

Gaarsiinta waa in la dhammeeyaa ugu yaraan toddobo maalmood ka hor taariikhda soo celinta.

④ Jawaab (kirayste)



Xaree jawaabtaada Taariikhda Soo Celinta ama kahor ama u soo qaado Maxkamadda.

- JDF 103 Jawaabta Ka saarida Guriga

⑤ Taariikhda Soo celinta & Maxkamadaynta (labada dhinac)



Dhinacyadu way kulmi karaan oo isku dayi doonaan inay arrinta xaliyaan Taariikhda Soo Celinta. Haddii aanu heshiis jirin, Maxkamadda ayaa muddaynaysa kiiska dacwadda.

Haddii dhinacyadu ku heshiiyaan shuruudaha, xaree:

- JDF 106 A Heshiis Shardiyaysan
- JDF 106 B Amarka (*kaliya samee §§ AC*)

Haddii aanu jirin heshiis, xaree:

- JDF 108 Codsiga Dokumentiyada

⑥ Fulinta (milkiilaha)



Haddii guriga laga saaro, Maxkamaddu waxay soo saari doontaa Amar Saaritaan.

- JDF 109 Amarka Fulinta Saaritaanka (*waxaa saxeexay Garsooraha*)

- a) Sug wakhtiga amarka saaritaanka.
- b) U gee Taliyaha Bilayska si uu u meel mariyo ka saarista.

Macluumaad Dheeraad ah

Hel Foomamka

Foomamka waxaa laga heli karaa mareegta Maxkamadda:

[\[www.ColoradoJudicial.gov\]](http://www.ColoradoJudicial.gov)

Sida loo Xareeyo

Bilow kiiska:

- Ka xaree maxkamadda degmada ku taala halkaas oo uu guriga kirada ku yaalo.

Ka dib marka kiiska la bilaabo:

- Si shakhsi ahaan ah uga xaree ama onlayn ahaan ah barta:

[\[www.jbits.courts.state.co.us/efiling\]](http://www.jbits.courts.state.co.us/efiling)

Looma heli karo kiisaska Maxkamadda Degmada Denver.

Khidmadaha Xaraynta

Milkiilaha:

Kiraystaha:

Haddii aadan awoodin kharashka, sidoo kale xaree:

- JDF 205 Mooshinka ka Tanaasulida Khidmadaha
- JDF 206 Amarka dib u celinta khidmadaha Maxkamadda (kaliya samee §§ AC)

Ka qaybgalka Maxkamadda

Waxaad kaga qayb gali kartaa munaasabadaha maxkamadda shaqsi ahaan ama onlayn ahaan (adigoo isticmaalaya shir muuqaal ah oo internetka ah).

Ku calaamadee dookhaaga Cabashada (JDF 101) ama Jawaabta (JDF 103). Ama xaree:

- JDF 105 Ogeysiis Ku Saabsan Ka Qaybqaadashada Onlaynka ah

Haddii la doorto, maxkamadda ayaa kuu soo diri doonta macluumaadka ku saabsan sida looga qayb qaato habka fogaanta.

Tallaabada 3aad ee Dheeraadka ah ee Gaarsiinta (loogu talagalay milkiilayaasha)

Dib u eeg Yeedhmooyinka (JDF 102 § 13 ee bogga. 4) hab gaadhsiin oo dheeraad ah. Gabagabadii:

- a) Diyaari koobiyada dokumentiyada Tallaabada 2aad si aad boostada ugu dirto kiraystayaasha.
- b) Ku xus tan Yeedhmooyinka (§ 13) markaad xeraynayso.
- c) Boosta ugu dir nuquladaas (leh lambarada kiiska iyo taariikhda soo celinta) Kiraystayaasha **markaba** kadib marka aad ku xarayso Maxkamadda (**maalinta shaqo ee xigta**).
- d) Wali gudbi JDF 98 (**uu saxiixay farriin-gaarsiiyaha ama Taliyaha Bilayska**) iyadoo muujinaysa in dokumentiyada sidoo kale lagu boosti gareeyay bogga hore.

Ka dib, haddii aadan heli karin dhammaystirka gaadhsiinta shakhsi ahaaneed:

- a) Maxkamaddu wali waxay amri kartaa guri ka saarid.
- b) Laakiin kuma siin karto xukun lacageed.

Ku guuldarreysiga

Qof ayaa kiiska ku guuldarreysta marka:

- a) Kiraystuhu aanu xaraynin Jawaab (JDF 103);
- b) Milkiiluhu aanu xarayn Jawaab (JDF 74) haddii Kiraystuhu sameeyo Dacwada Jawaabta ah;
- c) Ama, Dhinac aanu ka soo qaybgelin Dhageysiga.

Ka dib xaree:

- JDF 107 A Mooshin ku saabsan Gelitaanka Xukunka
- JDF 107 B Amarka Xukunka (kaliya samee §§ AC)

Qoraalladayda

- §§ macnaheedu waa "qaybo"